

## Dulmarka Guud ee Nidaamka Cabashada Bulshada Waxbarashada Gaarka ah (SECC)

Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI) waxay heshaa cabashada bulshada waxbarashada gaarka ah oo dhamaystiran oo uu waalidka soo gudbiyey. Cabashada waa la saxiixay sidoo kalena waxaa loo diray degmada dugsiga. (**Maalinta 1aad**)



OSPI waxay furtaa cabashada waxayna warqado iimayl ah u dirtaa degmada dugsiga iyo waalidka, iyadoo sheegaysa arinta (arimaha) si loo baaro. Warqada degmadu waxay degmada ka codsanaysaa inay OSPI siiso jawaab iyo waraaqo, sida Barnaamijada Waxbarashada Gaarka ah (Individualized Education Programs, IEPs), warbixinada qiimaynta, koobiyada iimaylada, iwm.



Degmadu waxay haysataa **17 maalmood oo isku xiga\*** si ay uga jawaabto arinta (arimaha) loo aqoonsaday baaritaanka. \* Marka laga reebo haddii ay OSPI siiso muddo intaas ka badan.



OSPI waxay heshaa jawaabta degmada ee cabashada dib ayeyna u eegtaa si ay u xaqiijiso in meesha laga saaray dhammaan macluumaadka shakhsiga lagu aqoonsan karo ee ku saabsan ardayda aan lagu aqoonsan cabashada.



OSPI waxay koobiga jawaabta degmada iimayl ugu diraysaa waalidka.



Waalidku waxa uu haystaa **10 maalmood oo isku xiga\*** si uu uga jawaabo macluumaad kasta oo dheeraad ah oo ay jeelaan lahaayeen in OSPI ay u tixgeliso qayb ka mid ah baaritaanka. \*Marka laga reebo haddii ay OSPI siiso muddo intaas ka badan.



OSPI waxay helaysaa jawaabta waalidka. OSPI waxay koobiga jawaabta waalidka iimayl ugu diraysaa degmada.



OSPI waxay dib u eegaysaa dhammaan macluumaadka ay bixiyen waalidka iyo degmadu taas oo qayb ka ah baaritaanka.



Haddii loo baahdo, OSPI waxay waydiin doontaa degmada ama waalidka inay bixiyaan macluumaad dheeri ah ama wax caddaynaya. OSPI waxaa kale oo laga yaabaa inay samayso waraysiyo ama booqashooyin toos ah oo fasalka ah.



OSPI waxay degmada iyo waalidka iimayl ugu diraysaa go'aan qoraal ah ugu dambayn **60 maalmood oo isku xiga** laga bilaabo taariikhda ay OSPI heshay cabashada. (**Maalinta 60aad**)



Dulmarka Guud ee Nidaamka Cabashada Bulshada Waxbarashada Gaarka ah (Special Education Community Complaint, SECC) ee [Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha](#) waxa uu ku shatiyaysan yahay [Shatiga Lahaanshaha ee Creative Commons](#).